# Diiwaanka Shaqsiga Ah Iyo Sumcadeyda Shaqada

Personnel Records & Reference Checks (Your Job File)

## Waa Maxay Diiwaanka Sharciga Ah?

Diiwaankaaga shaqsiga ah waxa uu ka kooban yahay xogta uu kaa hayo loo shaqeeyaha ee ku saabsan shaqadaada. Waxaa kale oo lagu magacaabaa galka shaqada. Waxyaabaha ku jira waxaa ka mid ah:

- Codsiga aad shaqada u soo qoratay
- Diiwaanka mushaharka
- Abaal marinada lagu siiyey iyo ammaan
- Diiwaanka shaqo imaashaha
- Qiimeynta sida aad shaqada u qabato
- Darajooyinkii kala duwanaa ee aad soo qabatay
- Digniinta, anshax marinta, ama ogeysiiska shaqo ka ceyrinta.
- Heshiiska canshuurta iyo lacagaha kale looga jaro mushaharkaaga
- Macaashka lagu siiyo sida fasaxyada caadiga ah iyo kan caafimaadka.

## Ma arki karaa diiwaankeyga shaqada?

Haa. Waxa aad xaq u leedahay in aad aragto galkaaga shaqada. Waa in aad qoraal ku weydiisataa haddii aad dooneyso. Waad arki kartaa hal mar 6dii biloodba haddii aad ka shaqeyso halkaas. Waa in loo shaqeeyuhu ku siiyaa nuqul lacag la'aan ah marka aad weydiisato.

Haddii aadan halkaas ka shaqeyn, sanadkii halmar ayaad nuqul weydiisan kartaa ka dib marka aad ka tagto shaqada, marba haddii ay goobta shaqadu hayaan galkaas. Waa in aad qoraal ku weydiisataa. Lacag in ay kaa qaadaan ma aha,



Hadii uu loo shaqeeyaha kuu diido, la xiriir qareen. Loo shaqeeyaha waa la ganaaxi karaa, waxaadna xaq u leedahay in aad dacweyso.

Haddii aad dacawayso, inta badan waxa aad soo ceshan kartaa uun wixii khasaare ah ee ku gaaray iyo kharashaadka ku galay. **Aan ka ahayn,** in ay dacwadaadu ku salaysan tahay qaan ah in qoladda shaqadaaddu ay kaa aargooysatay adiga (ay wax ku yeeshay) iyadoo sababtu tahay waxa aad codsatay inaad aragto diiwaankaaga shaqada, ama waxa aad ka mudacday wax ku jiray diiwaankaaga shaqada.

## Sidee ayaan ku arki karaa galkeyga shaqada?

Haddii aad dooneyso in aad aragto galkaaga shaqada, waa in aad qoraal ku weydiisataa. Waraaq u qor loo shaqeeyaha. Taariikhda ku qor oo nuqul ka reebo. Loo shaqeeyaha waxa uu

heystaa 7 cisho in ay kuugu ogolaadaan in aad aragto galkaaga shaqada haddii galka lagu hayo gobolka. Waxa uu heystaa 14 cisho haddii galka lagu hayo meel ka baxsan gobolka.

Xitaa haddii aadan ka shaqeyn halkaas, waxa aad xaq u leedahay in lagu siiyo nuqul ka mid ah diiwaanka. Haddii aad is leedahay qolada shaqadu waa ay kaa aargoosteen, wac qareen. Waxaa aad yeelan kartaa kiis fiican ku saabsan waxyeelo, lacag dib laguu siiyo, shaqaddii oo lagugu celiyo ama gargaar kale.

## Maxaan yeelayaa haddii aanan ku raacsaneyn waxyaabaha ku jira galkayga shaqada?

Waraaq u qor loo shaqeeyaha aad ugu sheegeyso waxyaabaha aad is leedahay waa khalad ku jira galkaaga. Weydiiso in laga saaro galkaaga. Haddii aanu loo shaqeeyaha ka saarin galkaaga macluumaadkaas aadan ku raacsaneyn, weydiiso in nuqul ka mid ah waraaqdaada lagu daro galkaaga shaqada. Nuqul (koobi) ka reebo warqadda.

Haddii loo shaqeeyaha ay u shaqeeyaan wax ka badan 20 shaqaale ama ka badan, waa in ay diiwaanka geliyaan warqadda aad ku diidan tahay. Taas ayaa u taagan in sida aad wax u aragto la diiwaan geliyey.

Loo shaqeeyaha kaama aarsan karo ka dib marka aad weydiisatay in aad aragto galkaaga shaqada ama aad codsatay in wax laga bedelo.

## Waa maxay macluumaadka uu loo shaqeeyaha iga sheegi karo haddii wax la iga weydiiyo?

Macluumaadka qaarkood loo shaqeeyaha ayaa kaa qori kara adiga oo aanu ogolaasho ku weydiisan. Waxaa jira macluumaad kale oo loo shaqeeyaha u baahan yahay inuu ogolaasho kaaga qaato si uu u bixiyo. Waxaa jira foom lagu magacaabo Bixinta Macluumaadka oo aad saxiixdo si aad ugu ogolaato.

Loo shaqeeyuhu ma bixin karo macluumaadkaan adiga **oo aan** u ogolaan.



- taariikhda dhalashada,
- mushaharka aad qaadato iyo kii aad horey u qaadan jirtay.
- faahfaahinta shaqada iyo hawsha aad qabato
- tabarada iyo waxbarshada uu loo shaqeeyaha ku siiyey.
- qoraalada ku jira galkaaga shaqada ee la xiriira rabshadaha, tuuganimada, ama waxyaabo aan sharci aheyn oo lagugu mariyey ciqaab ama is casilaad. Jawaabta qoraalka ah ee aad ka bixiso waa in la raaciyaa.

**Fiiro gaar ah:** Hadii loo shaqeeyuhu bixiyo macluumaadkaaga, waa in ay qoraal kugu soo wargeliyaan marka ay sidaas yeelaan. Waa in ay ku siiyaan nuqul ka mid ah qoraalka ku jira galkaaga shaqada.

Loo shaqeeye waxa uu bixin karaa akhbaartan soo socota kaliya haddii **uu** hayo ogolaansho Bixin ah oo aad adigu saxiixday:

- qiimeynta loo shaqeeyaha ee qoraalka ah iyo jawaabta aad ka bixisay.
- digniinta qoraalka ah ee anshaxa la xiriirta ee lagaa qaaday iyo talaabooyinkii 5tii sano ee ugu dambeysay iyo
- iyo qoraal ku saabsan sababta aad shaqada uga tagtay.

Hadii loo shaqeeyuhu bixiyo macluumaadkaaga, waa in ay qoraal kugu soo wargeliyaan oo nuqul kaa siiyaan marka ay sidaas yeelaan.

## Maxaa yeelayaa haddii xuquuqdeyda qarsoodi ka dhigista lagu xad gudbay?

Waxa aad cabasho u qori kartaa Waaxda Shaqada Iyo Warshadaha ee Minnesota haddii aad aaminsan tahay in xuquuqdaada gaarka ah lagu xadgudbay. Si aad cabasho u soo gudbiso, la soo xiriir (651) 284-5005 ama 1-800- DIAL- DLI (1-800-342-5354).

Waxaa kale oo kuu furan in aad dacweyso loo shaqeeyaha. Waa in aad ku dacweysaa loo shaqeeyaha 1 sano gudhiis ee marka aad ogaato in lagu xadgudbay qarsoodi kadhigista macluumaadka.



***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2024 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**